

Gadaangad

W.T. Faarax Cali Gammuute

Arar

Wax la yidhi, rag lays ku tiriyo ayay ka sebaanba ahaayeen. Wayse ahaan jirtaye, midkood baa loo gawaamay.'Lagu ma dhaamee, dhaqaaq' baa lagu yidhi. Cagtaa laga gujiyay. Damac baa hor booday. Gacantuu u haadiyay.Isna yidhi bal soo haabo. Raggay isku lugta ahaayeen ayuu u ged baxay. Guuxiisii ayuu u sheegtay. Si buu wax u filayay, iyana si kale ayay ula muuqatay. Waxaa yimi is maan-dhaaf. Waa la kala booday. Keligii buu guulmay. Wuu ka sibiq dhaqaaqay.

Muddaa ka soo waaday. Habeenkii dambay xisbigay mucaaridka isku ahaayeen fagaarihiisii cagta sii galiyeen. Sheed bay ka daalacdeen. Ninkii makarafoonka haystay markaa ayay qac indhaha ku siiyeen. Mise waa qudhiisii iyo ninkay waayo-waayo is ahaan jireen. Ushaa laysku taabtay. Waa lays dhawray. Indhahaa laga wada hadlay.Lama diran dibnaha. Aamuskaa lagu sheekaystay. Ka gadaalla midkood baa dhegta u ballaadhiyay. Kii kalase ninka afkiisii bay kaga dhegtay. Ishuu ka dusiyay. Shocad buu la yeeshay. "Ilaahow abuurtaada maanaan caayin," intuu ku mashiikhsaday, ayuu saaxiibkii gujiyay. Ku ye:"Horta ilkihiisu awal, ma sidaney u dhaadheeraayeen?"...

Anse taa waxaan ku keenay baan kuu dacaldhabiye, nimaan wejigiisu igu cusbayn baa maalinaan sidaa u fogayn laliyaha ka soo muuqday. Goob-jooge ahaan baa loo waraystay. Guul buu ka dhawaajiyay. Raadkiisii oon qallalin, welina sii qoyan, ayuu warkii soo galay. Dayraa isla meeshii laga soo tebiyay. Waysu kay qaban weyday. Kala-maan bay igu noqotay. Oomanteedii baan dib u guray. Sii gudhiyay raadkii...

Balse tuba, tu baad ku xusuusataaye, wax la yidhi, hooyaa wiilkeediiyoo toban dublaynaya aragtay. Kor waayeel wada indho weeyaane, midabbayntiisii baa ka yaabsatay. Fajac bay ku dhigtay. Shantay dhabanka la haabatay. Hami dabadiina, "U gogol badi", bay ku tallantay. Af-dhalaalkii baa se ka tan badiyay, oo waxa uurka jiiifuu afku kaa xadaaye, iyadoon is-ogeyn ayay tidhi, **"Alla Hantooliyow hooyo, diina badanidaa!"...**

Far baa se weli ii taagane, wax la yidhi, caawa oo kalaa gabadh la soo hooyay. Laba daryaale galool mudhay mullaaxdii sheegtay, oo googooska loo kala rogay, ayaa lagu habsaday. "Kanu galbay," baa ka yeedhay. Cirkaa mashxaradda lagu shareeray. Fiid horaadkiiba dhalinyaro is guratay baa gagidii ku kulantay. "Cagta garangarteediyo" waa halkii Hadraawiye, "Isu geeye jiibkii". Maddad bay yeelatay. Gooray sidaa isugu dhacayso, oy saareydu cugashada ku haloosiyayaan, ayay aroosaddiiyoo ka tuuraysaa is keentay. Iyadoon dheg la qabto lahayn oo dhex taagan baa la arkay. Is laba roggeedii baa xigay. Way ku leexaysatay!

"Sida, sida" markay tidhi

Dadku 'sida' is weydii

Oo saa u wada dhawr

Sakatiga la yaabyaab

Afka gacan la saarsaar

Lana yidhi saluuggii

"Siddidaada mooyee

Dhul-dhacaaga maad sugi"!

Sidu hadaba, sidaa weeye, waxna layna tusye, kaftan-dhablaa odhanaaya:-

Wan galaalanoo galshaystay

Farow goobayoo gumbaaxsan

Oo gidhayska gaar u saaran

Isha gooman goorba dhawrto

Ku guyayso aw gorfaystay

Gees biciidna sii galaystay

Wax galaaftayoo lug gooyay

Nayl galaalanoo gol yuuban

Oo gunaafsanoo gal hoolan

Oon lahayn gash iyo goosi
Isna gaws ku soo gariira
Oo gidaadka kula goobta
Oo la gawrac gam ka siiya
Oo af gaana gab ku siiya
Oon giniinna reebin goojo
Ku guhaami waa gartiiye
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Guure ninka isla giijin
Gadh hawaysan geed ku yaalla
Hawd ganuunka cir galgaalay
Oo ganaanan gaax ka nuugay
Ee guduuday sida Goondhar
Gubnigiisu gaardiyaayo
Oo gurbaanno loo garaaci
Oo garaadadii la gooxan
Oo godaaya Golxadiisa
Oy garoomo galacleeya
Ka galaydhin gaadadiisa
Kaa gadiisa geela toosan
Ee gadaanka gundhinaaya
Gibladiisu waa gidhiishe

Maaha gadhku gadh la mooday
Gaydhu maaha mid gardaadsan
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Carrab qawla oon gobaadsan
Oo gankeeda gargarooda
Ganga yeeshe gaatiroobay
Yaa guraangur gig ka siiyay
Oo ye "Goodir awr la gaadhay
Kuma guuxin wayse goojin
Oo gunaadka gantadiisu
Ay gahaydhay gawdu maaha
Oo galooftan gommod raaran
Yaa galdhiidhi soo gufaacin
Oo gamboolka geel ku naaxay
Yay la goorri giira laysay
Oo gamaanku gendi loo xidh
Diin garmaamo kuma gaadho
Goob dagaalla wax ka guulma
Geesi xeesha galbanaaya
Oo guhaadda gildhigaanku
Waa gargaare geeri maaha
Gonda dhiigle gaashadoodu

Gallad weeye aan la gawdhin
Oo galoolku geeddi maaha
Kama guurin gaamankeenna
Wax guneeya oon gabloolin
Ruux gaboobay guruxiisa
Fay gamuurta 'Garan-waaga'¹
Oo dhul gaade gaadh ka meershay
Kula gaaso Gaanyo weerar
Sii gantoobo waa guduuta
Yaa guyeystay gablamooyin"
Anse guddi yaan u gayne
Far gol daarran yay godaane
Saw gataati layl gudaaya
La gad maaha giida yeedhay
Ee gadiidka gudcur mooday
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Goolwaraabe geel la jooga
Galangoolli cayn ku giijin
Gurgurshaaga oo gacmoodin
Oo garraaxi yaan garaadku
U garaabinoon galayne

¹ Waa geed dhulka ku cusub, oon xoolo daaqin si kalana loogu manafacaadsan

Ummad gaana oo gadaaman
Oo gashoo abaal gudaysa
Garyaqaanno maalin gaala
Geed u saanyan gar la sooro
Iyo guurti loo goleeyo
Gobta liicday gaasiraada
Goonka taabo waa gadaafo
Gasariiri waa gabood fal
Oo gafuur xidh waa gef weyne
Oo gasaangas geed-xadhaadha
Gombashaa sidii nin goostay
Oo gaf siiyay la gasaasac
Fahma guurka geesa yeelay
Oo gol haawatoo go'doona
Oy gandoodo guun hinaastay
Oy giniistu ka gunuusto
Guuldarrayste gabayooxsay
Sii gaddoonka gabalaaxsay
Soo gaddoonka gambadhuudhsay
Oo la raad gur gabbalkii dam
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Lax guyaadu ay gardhawday

Oo garaarta gambiyaysa
Oo gargoorka la galbeedsan
Oo galaa-bax gaambinaysa
Soona gaadhay gartalawga
Soodh gahaadhka gees u xooray
Oo gal diiday giirre haysta
Yaa gamaarshe afka goosay
Moog gadiisa gaag ma reebe
In galuubne goonjigeeda
Uu gasiiman garan mayso
U garaad la' gaashaweynta
Kolba goosan Guube saydhay
Oo gacdeeda gorgor eegi
Geed u saaran gog ka dhaansay
Gasabkeed ba' waa ka guure
Doolka geeyay godka caarre
Ee gadh-qaaday loogu daw gal
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Goof markuunan gooshna waayin
Wiil gardiidka Giib is mooda
Been is geeya gawga loolka
Nin la gigay gaararkiisa

Oo gudaaya magan gooye
Oy gubayso yeedha gaarran
Oo garawshe ka gulaalan
Oo ku giiran bir ma gayno
Goxoshaana goondhabaalin
Galawgiisu gooh ma daayo
Oo gabiibta raq gawaansan
Haad gablaynayaa ku gaylan
Oo garraanta kii giriifay
Ee ka guulay goonyihiisu
Guuldarruu u qaatay guule
Galti eegay uu la guulo
Guufanaysyo galgalaysay
Gurdan raaca geenya buubsay
Gungunaafyo sii gantaare
Oo gasiirad googo yaalo
Gaafaheeda sii gaboodsay
Oo gamiinta garba haawan
Oo gawaana ka gunuunuc
Gaws la doojo ku gunaanad
Sida goray gaar u siiban
Hadba gooddi gooni laasim
Oo gacweynta gabaxuursan
Gondahooda guuf ka jiiday
Oo gubtaayo wax giniinsan

Waa galoo bidhaan guduudan
Gorof caydha wiil la gaafan
Mar gurreeye Reer Galbeedku
Marna gudur giir cigaalan
Gabay raaciyoo u soo god
Ruuxa guurta la gucleeya
Gacma hoorsigaa gumeeya
Oo dheg gawlanoo garoofan
Oo garruumo lagu gooyay
Oo guyaalba gurrac yeeshay
Gidh ka siiyay goosatooyin
Oo gandaala geedo weedh leh
Oo gobaysan yaan godlayne
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Guyigeenna awr gulaana
Garba beele gaarabiido
La godnaadayoo gan diiran
Oo gabraarsi loo gureeyo
Good u daaya is gamaarin
Oy gadhoodho guntimawday
Gujinayso gawnaxiisa
Iyo guubis gaal ka liita

Oo gumaada gacalkiisa
Iyo goonle gaatamaaya
Oo la gaadi guul haraadan
Iyo guuto loo gawaamay
Oo la gayfan Jirjir geello
Iyo gaasas gaylamaaya
Oo garnaylo gilgilaaya
Iyo maan gad guud ciroobay
Oo gun raacay oo gol jeexay
Siina goobay yahay juuq gab
Ganna'diiba ay ka guurtay
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Guunyo ooman gaarufkeeda
Yaa gun dheere gar u looshan
Kii ganee ku goolibaadhay
Ee gamuunka ku gadoodshay
Iyo galac kaan ku guulin
Gocomaale wuu gartaaye
Godobtaa ka haysa gaadhka
Ninka gaystay oon gedmayne
In gubaysa oo galaafan
Yaa guntiisa geedba taalle

Nin gu weyni wuu guntaaye
"Ha la gaadho" yuu guraaye
Gabayaana tii ku gaarran
Gaaxinteeda gar u yeelay
Gadda cawlka aan la goojin
Ee gurboodka gal la haybsan
Yuu galgaalka gujiyaaye
Godka maanso goor lahaaye
Wiil galaangal aan gafaynin
Sii garmaamin godol noolba
Oo u gooshi guryo laalan
Gaaraguufyo ka min guursan
Oo gamaaya cag mar gawre
Marna gale soo gardaadshay
OO gantaalin rays ma gaadho
Raarta Gaydhe² gundhadeed jar
Oo gadaafe galsha miirka
Wiil gadaafo la golaysay
Shax gimgiman loo garwaaxsay
Oo ku guule Goobaleyda
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan

²Ku xusuuso Dalaayad (AUN) iyo tuducii ahaa:
"Gashi laysu sheegtiyo ninkaan godobi qaaxaynin
Een geeridii Shiikh Bashiir guudka laga saarin
Ee aan sidii Gaydhe Ruxe gubanin jaahiisu
Geestii la doonaba khalqiga wuu ku gelayaaye"

Saw ma gaacin gaawaheeda?

...

Wiil galoolka ged la maagan

Gaal tumaashay girgirawday

Oo gantoobi ku garaacye

Kasha guran ee gidaadka

Gaanjibawda Gasku duulye

Kii ganaanka galax mooday

Ee ka giigay gumar hiinsay

Oo gog wayda gafanaysay

Oo gabdhawga gibil doorsan

Sii gahaangah agas loo gub

Soo gahaangah axan loo gub

Garkan haabay oo garkaa taf

Mar ta guudba gaar u yeelay

Goonidiina u go'aansay

Oo ye "Geeska gaanka yaala

Taan u gooyo ha guddoonto

Guuxna reebin oo gamuuran

Guruc dheerna waa la goyne

Gamas baa dhegtii la qawlay

Ee gufaysan gundhabaaya

Oo galiilyo gagab waalan

Yaa la gaadhi ganaf taagan"

Marna garri gawya laalan

Yeedha Geysa ka gariiri
Oo ye "Gartu geed u jooge
Yaan la goynin gacaltooyo
Goorta waagu guubihiiisa
Lawga geeyo goxosh raadka
Gurbinaaya oo gardaadka
Gasar toobay sii gandoodin
Yuu gugiisu garbiyaaye
Oon goltiica gagsanayne
Yaan la gocan gabal aaska
Sii galbeedshay oo gadoomay"
Marna golcas gooddiyaysa
Iyo gaadhi, gaadhi saara
Uu go'iisa gees hadhaystay
Yaa galshooyin gimidhlaynta
Is gadhoodhin loo gawaanshay
Oo ye "Gaydha galgalkayga
Yaa ganaane oo gufaaco
Soo galaalay la gudboone
Gable Shimbir ii goleeya"
Anse guddi yaan u gayne
Far gol daarran yay godaane
Sida gumbur gaafya xaydan
Iyo goobbo daahya goysay
Gunti buuran giigtirnaanta

Gurux dhawray gaadh warkiiye
Xaaja guuna oo gun sheelan
Yuu garraado gadac sheegtay
Gadalabe aan gedmaynin
Gulucdeeda gaw tiraaye
Gabadhleeye wuu gabaaye
Naas gabloomka gorofaaday
Yaan ganuunka gobo' layne
Sahan golli yaan ku gaynin
Guryasamo oon gayoonne
Bahal gubux gool ka siiyay
Yaan gidhiida kala goyne
Genso dudun gaws qaniinka
Marna gosha sii gaboodso
Waa gorgori gawrac ciidle
Oo gumburi gob ku soore
Ayx guuray gaade reebye
Gooddi-kulan lala gaatin
Geed is-marin goorba cayna
Gododleeye geesh abuurte
Kanna giidu waa gadaase
Anna goohu waa gartaye
Ma gudbaanku geed u mooqda
La gabaanad gaadhi maayo
Xaggu gabi oo gagaab dheh

Xaggu gabi waa gur oodan
Gabgabtiina waa gabaabsi
Goob aboodi ku gadaashay
Oo gamaada kii la geeyay
Ee u guuray soo gadaal bax
Oo gadaangad yaan gudhayne
Sheeka gaaban oo giraansan
Saw ma gaacin gaawaheeda?

W.T. Faarax Cali Gammuute

E-Mail: farahgamute@gmail.com